# Go’aanno ka qaadashada ku saabsan caafimaadkaaga, daryeelistaada iyo dhaqaalaha…

## Kumaa go’aaminaya markii aad go’aamin kari weydo?



Waxaa jira sharci cusub oo kaa caawin kara

Jirro miyaa ku haysa, dhaawac ama curyaannimo kugu keeni kareysa caqabado go'aan gaarista ah?

Miyaad xannaaneysaa, la shaqeysaa, ama garaneysaa qof ay Caqabo ka haystaan go'aan gaarista?

Ma dooneysaa horay inaad u qorsheyso haddiiba ay dhacdo inaad awoodi kari weydo sameynta go'aannada muhiimka ah ee naftaada mustaqbalka?

Waxaa jira sharci cusub oo kaa caawin kara.

## Xeerka Karaanka Maskaxda ee 2005

Maalin kasta waxaannu gaarnaa go'aanno ku saabsan waxyaabo fara badan oo nolosheenna ah. Awoodda lagu gaari karo go'aannada waxaa lagu magacaabaa karaanka maskaxda. Dadku waxaa dici karto dhibaatooyin inay ka soo food saaraan  sameynta go'aannda qaarkood ama kulli ahaan ama qaar ahaan waqtiga. Taasina waxay noqon kareysaa sababta oo ah waxaa haya dadkaas:

- Curyaannimo xagga barashada ah
- Xusuus gaddoon
- Dhibaato caafimaadka maskaxda ah
- Dhaawac madaxa ah ama xanuunka qalalka ah ee qaybaha jirka

Hadana mid kastoo innaga mid ahi wuuu sii qorsheysan karayaa haddiiba ay karaanka maskaxdu nagu yaraato mustaqbalka, maxaa yeelay shilka dhaca tusaale markaan u soo qaadanno.

Xeerka Karaanka Maskaxda waxaa la qorsheynayaa inuu hirgalo bisha Abriil ee 2007 kana dhaqan galo Ingiriiska iyo Gobolka Weelis, isla markaana Wuxuu saameyn doonaa dadka ku jira xaaladahaas. Wuxuu xeerku sidoo kale saameyn doonaa qoysaskooda, xannaaneeyeyaasha, shaqaalaha xannaaneynta caafimaadka bulshada, ama dadka kale ee laga yaabo inay xiriirka la leeyihiin iyaga. Waxaa xeerku dabooli doonaa dhammaan noocyda go'aannada waaweyn ee ku saabsan marka qofka karaankiisu yaraanayo, waxyaabaha ku saabsan dhaqaalaha, xannaaneynta bulsho, daaweynta caafimaad iyo isku dubbaridyada daraasadda baaritaan iyo sidoo kale go'aannada maalin kasta.

Xeerku Wuxuu saameyn ku yeelan doonaa oo keliya dadka da'doodu tahay 16 jir iyo ka weyn.

## Sida Xeerku saameyn kuugu yeelan karo

Haddii aadan awood u heli karin sameynta qaar kamid ah go'aanno sameynta Xeerku wuxuu sharraxkaa siinayaa:

- In aad heshid caawimaadda loo baahan yahay ee macquulk ah ee aad ku sameynaysid go'aannada kuu gaark ah
- sida qiimeynta karaanka in loo sameeyo ay tahay kuna saabsan in aad awoodi kartid inaad sameyn karto go'aan gaar ah lana sameynayo waqti gaar ah
- in xitaa haddii aadan lahayn karaankii aad ku sameyn lahayd go'aanka sida aadka ah kuugu adag naftaada, taasi aysan la micne aheyn in aadan awoodi karin sameynta go'aannada sida tooska ah aad u sameynaysid
- in xitaa haddii qof kale kuu sameynayo go'aan gaarista isagoo ku metalaya, weli ay waajib kugu tahay inaad ka qayb qaadatid arrintaan sida ugu macquulsan ee suurta galka ah
- In qofkii go'aan gaaraya isagoo ku metalayaa u sameynayo **sida dantu kuugu jirto**
- In la helo ilaalin xagga sharciga ah, Garyaqaanka Madaxa Bannaan ee Karaanka Maskaxda (IMCA), inuu ku metalo haddii aadan laheyn karaanka aad ku sameyn laheyd go'aannada mucayinka ah ee muhiimka ah isla markaana anay jirin cid kale oo aad kala tashan kartaa.

**Haddii aad dooneysid inaad horay wax u sii qorsheysatid mustaqbalka Xeerku:**

- Wuxuu kuu oggolaanayaa inaad asmeysatid **Garyaqaan Wakiilasho Buuxda** (LPA) taas oo ku saamaxeysa inaad magacaabatid qof inuu kuu sameeyo go'aannada ku saabsan dhqaalahaaga iyo hantidaada ama xannaaneyntaada caafimaad iyo daryeelka haddiiba aad kari la'dahay karaankii aad naf ahaantaadu ku sameysan laheyd go'aannadaas

- Xeerku wuxuu kuu saamaxayaa inaad sameyso 'go'aan qaadasho hore oo aad ku diidi kartid daaweyn' Haddii ay jirto daawo caafimaad oo aadan dooneynin inaad qaadatid waqti mustaqbalka ah markaas oo aadan awood karaan u laheyn diidisteeda.

**Haddii aad tahay qof qoyska qofkaas ah ama xannaaneeye kale oo aan waxba qaadanin Xeerku:**

- Wuxuu kaa caawin doonaa inaad fahanto sida iyo goorta aad metali kareysid adoo metalaya qof uu ku yar yahay karaankii uu ku gaari lahaa go'aannada – iyo ilaalinta xagga sharci iyo xadadka haddii aad u qabaneysid taasi
- oo ku fareysa inaad kala tashatid arinta qofka dad aqoon leh marka, tusaale ahaan, dhakhtarku go'aanka ka gaarayo daaweyn xubin qoyska ka tirsan ah kaas oo aan laheyn karaankii uu go'aan ku gaari lahaa.

**Haddii aad ka shaqeysid xannaaneyta bulshada ama caafimaadka Xeerku:**

- wuxuu ku siinayaa qaab hawleed lagu qiimeynayo karaanka qofka maskaxdiisa iyo go'aan ka qaadashada iyadoo loo eego maslaxadda qofka haddii uusan laheyn karaankii uu ku gaari lahaa go'aanka
- xeerku wuxuu leeyahay ilaalin xagga sharciga ah iyo xaddidaadyo ku saabsan markii aad la shaqeynaysid qof aan karin karaankii uu ku oggolaan lahaa inuu qaato xannaano ama daaweyn.

**Haddii aad ka shaqeysida qaybaha sharciga, bangiyada ama talo bixinta Xeerku:**

- wuxuu dhigayaa oo qura, qaab hawleed isku xiran oo lagula dhaqmo arrimaha karaanka maskaxda iyo nidaam lagu hagaajinayo sugidda waxyaabaha lagu muransan yahay, la macaamilka caafimaadka iyo arrimaha daryeelka, iyo arrimaha dhaqaale ee dadka aan laheyn karaanka ay wax ku go'aansan lahaayeen.

## Xeerku wuxuu abuurayaa Ilaalinno muhiim ah oo xagga sharciga ah:

- Maxkamad cusub oo Ilaalinta ah taas oo yeelan doonta awood ay ku shaacin karto waxyaabaha ku sabsan haddii qofka karaankiisu yar yahay iyo haddii kale, inay sameyso amarrada ama magacawdo wakiillo metala isla markaana go'aanka u qaada qofka karaankiisu liito. Xaalado badan dartood, waxaa jiri qaabab kale oo lagula dhaqmi doono xaaladaha qalafsan iyadoo aan la aadin Maxkamadda, siad iyadoo la marayo hab raaca cabashooyinka ee jira
- Sarkaal cusub oo dadweyne oo lagu magacaabo Ilaaliyaha Dadweynaha kaas oo yeelan doona waajibaadyo door ah sida ku xusan Xeerka kana mid tahay diiwaan gelinta (Garyaqaannda la magacawdo)) iyo wakiillada maxkamadda dul kala socoshadu magacaabato. Ilaaliyaha Dadweynaha (OPG) waxaa taageero ka siin doonaa fulinta waajibaadyadaas Xafiiska cusub ee Ilaaliyaha Dadweynaha (OPG) kaas oo beddali doona xafiiskii horay u jiray ee loo yiqiin Xafiiska Ilaalinta Dadweynaha (PGO)
- **Diiwaan gelin cusub oo ah dembiyada loo galo** macaamil xumada qofka lagula dhaqmo ama dayacaada ku talo galka ah ee lagu sameynayo qofka karaanka go'aan qaadashadu ku yar tahay.

**Ku dhaqabka Anshaxa,** oo la soo saaray bishii Diseembar ee sanadka 2006, ayaa sharrax ka bixin doonta sida sharciga cusubi u shaqeyn doono. Xeerku wuxuu leeyahay aqoonyahannada iyo xannaaneeyeyaasha wax qaata, kuwa ay kamid yihiin, waa in lagu xusa Baaqa anshaca.

## Sidee ayaa Xeerku u saameyn doonaa qorshihii horay u jiray?

**Haddii aad tahay qof wax u qaada qof  karaankiisu liito:**

- waxaad awoodda sii hayn doontaa wixii ka dambeeya bisha Abriil ee 2007 laakiin waxaa laguula dhaqmi doonaa sidii ku xigeen, ay soo magacawday Maxkamadda cusub ee Ilaalintu. Xafiiska Ilaalinta Dadweynaha ayaa la xiriiri doonta dhammaan qaateyaasha waqtigaan xaadirk ah si loo sameeyo isku dubbaridyada lagama maarmaanka ah ee maamul. Lagaagama baahna inaad nala soo xiriirtid annaga.

**Haddii aad sameysay magacaabis Awood Garyaqaan Joogto ah (EPA) ama aad metaleysid qof sida ku xusan EPA:**

- weli way sii shaqeyn doontaa wixii ka dambeeya bisha Abriil ee 2007, xitaa haddii aan weli la diiwaan gelinin, haddii aan qofka sameeyay EPA-du go'aansan inuu joojiyo arinta isla markaana ku beddalayo halkeedii Magacaabashada Garyaqaanka Awoodda Leh.

**Kahor bisha Abriil ee sanadka 2007**

Isbeddaladaani waa inaysan siday doonto ha noqotee, kaa hor istaagin inaad ku dhaqaaqdid ficillada lagama maarmaanka ah ee aad hadda ku qorsheynayso mustaqbalka ama aad k maareynaysid arrimaha dhaqaalha ee qofka karaankiisa maskaxeed yar tahay. Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir Xafiiska Ilaalinta dadweynaha:

E-mail: custserv@guardianship.gsi.gov.uk

Taleefanka: 0845 330 2900

Ama booqo barta internetka ah: www.guardianship.gov.uk

# Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan Xeerka cusub

Inta ka harsan dhammaadka sanadka 2006 waxaan soo saari doonnaa macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan buug yareyaal (bilaash ah) kuna saabsan kooxaha soo socda ee dadka ah eeuu saameynayo Xeerku:

1. Dadka karaanka maskaxeed inuu ku yaraado ay noqoto ama doonaya inay horay u sii qorsheystaan mustaqbalka
2. Qoyska iyo xannaaneyeyaasha aan waxba qaadanin
3. Shaqaalaha ka shaqeeya caafimaadka iyo xannaanada bulshada
4. Garyaqaannada iyo shaqaalha talo siinta
5. Dadka ay haystaan caqabadaha barashada

Haddii aad jeclaan laheyd inaad heshid buug yareyaashaan fadlan nagala soo xiriir bartayada internetka ama cinwaanka ku yaal xagga dambe ee xaashidaan warsidka ah, adigoo muujinaya kuwa aad jeclaan laheyd inaad heshid. Haddii aad dooneysid macluumaadka kale ee ku saabsan Xeerka, kana mid yahay maqaaladda ama jaraa'idka kuu sheegaya adiga sida sida hirgelinayo arrinta, fadlan booqo bartayada internetka ee ah;
www.dca.gov.uk/capacity/index.htm

## Xiriirka iyo macluumaadka faafaahinta

| | |
|---|---|
| Cinwaanka boosto waa: | Mental Capacity Implementation Programme<br>Department for Constitutional Affairs<br>5th floor, Steel House<br>11 Tothill Street<br>London<br>SW1H 9LH |
| Taleefanku waa: | 020 7210 0037/0038 |
| Fakisku waa: | 020 7210 0007 |
| E-mailku waa: | makingdecisions@dca.gsi.gov.uk |
| Barta internetku waa: | www.dca.gov.uk/capacity/index.htm |

Xaashidaan warsidka ah waxaa lagu heli karayaa luqado kale iyo qaabab kale oo ku xiran codsasho.

Macluumaadka ku yaal Xeerka Karaanka Maskaxda ee cusub waxaa idiin soo gudbinaya ururrada soo socda:

DH Department of Health

Llywodraeth Cynulliad Cymru
Welsh Assembly Government

public
**guardianship**
office

dca
**Department for Constitutional Affairs**
Justice, rights and democracy

© Crown Copyright 2006

ref MCIP1